Ka bilow Maajo 27, 2017, Washington Administrative Code (WAC, Xeerka Maamulka Washington) waxay u baahanyihiin in codsiyada oo dhan ee shatiyeynta iyo dhammaan bixiyayaasha guriga shatiyeysan iyo xarunta waxbarashada hore si looga baaro saadka biyahooda mirirka iyo naxaaska haddii loo isticmaalo cabitaanka, karinta, ama ku diyaarinta caanaha gasaca ilmaha.

Isticmaal tilmaantaan si ay kaaga caawiso aqoonsashada qasabadaha la baarayo, hel sheybaarka la xaqiijiyay ee lagu sameynayo falanqeynada, oo qaad tallaabada dabagalka ku haboon. Waxaan sidoo kale ku talinay aqrinta *3Ts for Reducing the Lead in Drinking Water in Child Care Facilitie (3 T's oo Yareynta Mirirka oo Biyo ku Cabayo Xarumaha daryeelka Carruurta ) s* ee ka imaanayo Environmental Protection Agency (EPA, Hay'ada Illaalada Deeganka) oo wixii warbixin ee ku saabsan saameynada caafimaadka ee mirirka, sida ay u galaan biyaha la cabo, qaababka aad ku caawin kartid yareynta gaarista mirirka ee biyaha cabitaanka, iyo sida loola xiriiro waaladiintaada iyo shaqaalaha. Iyada oo noqon karto illo wanaagsan ee warbixinta, **waa inaad isticmaashaa tilmaamaha hoose ee lagu aruurinayo mirirkaaga aad u baahantahay iyo muunooyinka naxaaska.**

## Nidaamyada Muunada

### Ka hor inta aadan bilaabin muuno qaadista

1. **Ka qaad qasabada aad u baahantahay inaad baartid:** Waxaa lagaa rabaa inaad ka qaadid muunada **qasabada walboo biyaha ee loo isticmaalo cabitaanka, karinta, ama ku diyaarinta caanaha gasaca ilmaha.** Samey liis oo sii qasabad walba magac gaar ah (tusaale ahaan, tuubada Jikada, Sinkiga Aaga Ilmaha, iwm.). Joogtey liiskaan si markaas ula ekaado natiijooyinka aad ka heshid sheybaarka ee qasabada aad u baahantahay inaad baartid. Haddii aad qabtid dhoor qasabad oo way adagtahay in muuno laga qaado dhammaantood hal jeer, muunooyinkaan waxaa la sameyn karaa maalmo kala duwan. Raac nidaamkaan muuneynta waqti walba aad qaadid muunada.
2. **La xiriir sheybaarka biyaha la xaqiijiyay si aad ugu baartid muunada.** Department of Ecology (Waaxda Cilmiga deegaanka) waxay aqoonsataa dhammaan sheybaarada biyaha la cabo ee Gobolka Washington. Waxay leeyihiin liis, waxaa diyaariyay gobolka, oo dhammaan sheybaarada la aqoonsanyahay si loo baaro muunooyinka biyaha cabitaanka. Hel sheybaar u dhow ee leh mirirka iyo naxaaska ee liiskooda falanqeynta. Soo wac sheybaarka, u sheeg baaritaanka aad sameyneysid, oo samey qorshaha lagu helayo dhalooyinka aad u baahantahay (sheybaarada ayaa caadi ahaan ku siiyo kuwaan). **Muunooyinka waa in lagu qaadaa dhalada 250ml.**

### Qaadista muunooyinkaaga

Waxaad qaadeysaa muunada "soo baxa koowaad", taas oo micnaheeda yahay **biyaha waa inay ku fariistaan qasabada tuubada ugu yaraan 8 saacadood, laakin wax ka badan 8 saacadood.** Way sahlantahay in la qaado muunooyinkaan sheyga ugu horeeyo ee subixii. Haddii isticmaaleysid xarunta guriga dhexdiisa, isku day inaad ku isticmaashid biyaha guriga ama falaashtid musqusha inta lagu jiro habeenka illaa muunooyinka la qaado. *Haddii xaruntaada la xiro dhammaadyada isbuuca, haka qaadin muuno Isniinaha.*

- **Haka saarin afka hore tuubada** qasabada waqti walba inta lagu jiro nidaamka muuna qaadista.
- **Kaliya biyaha qabow ee muunada.** Iska hubi in biyaha qabow ay yihiin biyaha ugu dambeeyo ee marayo qasabada ka hor inta aysan ku fariisan habeen dhaaf.



**Dhacdada** Warbixinta halkaan ku jirto ma ku xirna sharciga laakin waxaa si kaliya lagu bixiyay jaheynta guud. Kala tasho Revised Code of Washington (RCW, Xeerka Dib loo eegay Washington) ee hadeer la sameeyay Washington Administrative Code (WAC) ee sharciyada quseeyo iyo xeerarka.



1. **Sheyga ugu horeeyp ee subixii**, dhig dhalada muunada hoosta qasabada oo ufur tuubada biyaha qabow qulqul caadi ah.

2. **Ku buuxi dhalada muunada** garabka ama leenka calaameysan “250 ml”. Si dhuuqsan u xir daboolka.



3. **Buuxi qaabka sheybaarka iyo simmada dhalada** (haddii ay quseyso). Qaar ka mid ah warbixin muhiim ah ee la qabanayo waa:
   - Magaca xaruntaada, warbixinta xiriirka iyo biilka
   - Xog aruurinta iyo waqtiga
   - Magaca qofka qaadayo muunada
   - Nooca muunada (kuwaan waa muunooyinka “soo baxa koowaad)
   - Magaca qasabada (tuubada jikada, sinkiga aaga ilmaha, iwm.)



4. **Ku celi nidaamkaan oo qasabad walba ee loo isticmaalo cabitaanka, karinta, ama u diyaarinta caanaha gasaca ilmaha** oo gudbi muunooyinka ee sheybaarka oo falanqeynada.



**OGEYSIINTA:** Warbixinta halkaan ku jirto ma ku xirna sharciga laakin waxaa si kaliya lagu bixiyay jaheynta guud. Kala tasho Revised Code of Washington (RCW) ee hadeer la sameeyay Washington Administrative Code (WAC) ee sharciyada quseeyo iyo xeerarka.

## Waxa la sameeyo haddii natiijooyinkaaga ay ka weyn yihiin heerka tallaabada EPA oo xarumaha daryeelka carruurta

Marka aad ka heshid natiijooyinkaaga sheybaarka, eeg si aad u aragtid haddii kuwa ka mid ah qasabadaha ay leeyihiin natiijada kore 20 qeybaha oo bilyankiiba (ppb) (0.020 mg/L) oo mirirka ama 1300 ppb (1.30 mg/L) oo naxaaska ah. Haddii kuwa mid ah
qasabadahaan dhaafaan heerarkaan waa inaad qaataa tallaabooyinka xigga:

- **Isla markiiba jooji biyo ka qaadashada qasabahada ee dhaafa heerka tallaabada** oo bilow inaad u isticmaashid biyaha dhaleysan oo baakideysan cabitaanka, karinta iyo u diyaarinta caanaha gasaca ilmaha. Haddii aysan kuu suurtogaleynin inaad siisid biyo dhaleysan ama baakideysan oo aad buuxisid baahiyada xaruntaada, waa inaad xirtaa illaa aad ka buuxisid baahiyada biyaha dhalada ku jiro ama baakideysan. Biyaha qasabadahaan weli waa loo isticmaali karaa isticmaalada qoyska (maacuun dhaqida, dharka, guri illaalinta imw).
- **Isla markiiba la xiriir Xafiiskaaga Shatiyeynta DEL.** Kula tali natiijooyinka sheybaarka iyo tallaabooyinka aad qaadeysid aad ugu illaalisid carruurtaada xaruntaada.
- **Ogeysii dhammaan waaladiinta iyo masuulada natiijooyinka baaritaanka.** Waa muhiim inaad kala xiriirtid waaladiintaada iyo shaqaalaha wax la xiriiro natiijooyinkaaga imtixaanka iyo tallaabooyinka aad qaadeysid. EPA 3Ts for Reducing the Lead in Drinking Water in Child Care Facilities leedahay qeybta xiriirka oo waa illo wanaagsan ee kugu caawinayo go'aansiga goorta, waxa, iyo sida loola xiriiro waaladiintaada iyo shaqaalaha.
- **Qaado muunooyinka "dabagalka".** Muundooyinka dabagalka (inta badan loogu yeero muunooyinka biyo raacinta) waxaa loo naqshadeeyay inay tusiiso haddii mirirka iyo/ama naxaaska ee muunada ka soo baxa koowaad wuxuu ka imaanayaa qasabadaha ama tuubada ka gadaaleyso darbiga u hogaaminayo qasabada. Kala duwanaanshaha ugu muhiimsan ee u dhaxeeyo ka soo baxa koowaad iyo dabagalka muuna ka qaadista waxay u ogolaaneysaa biyaha inay socdaan 30 ilbiriqsi u dhaxeyso qaadashada
  muunada. Fadlan raac tallaabooyinkaan lagu aruurinayo muunooyinka dabagalka:
  - **Haka saarin afka hore tuubada** qasabada waqti walba inta lagu jiro nidaamka muuna qaadista.
  - **Kaliya biyaha qabow ee muunada.** Iska hubi in biyaha qabow ay yihiin biyaha ugu dambeeyo ee marayo qasabada ka hor inta aysan ku fariisan habeen dhaaf.
- **La xiriir DEL markii aad heshid natiijooyinkaaga.** Marka aad heshid natiijooyinkaaga ee ka imaaneyso muunooyinka dabagalka, la xiriir Xafiiskaaga Shatiyeynta DEL si aad uga hadashid natiijooyinka danagalkaaga muuna sameynta iyo tallaabooyinka xiggo.
- **Joogtey si aad usiisid biyaha dhaleysan ee baakideysan.** Xafiiskaaga Shatiyeynta DEL wuxuu kaala shaqeynayaa qorshaha lagu sheegayo mirirka iyo heerarka naxaaska xarunta iyo xal u helida oo kuu ogolaaneyso inaad isticmaashid biyah tuubada markale. Waa inaad joogteysaa inaad siisid biyo dhaleysan iyo baakideysan illaa saqabadaha markale waa la tijaabiyay waxay ka hooseysaa tallaabada heerarka EPA ee mirirka iyo/ama naxaaska.



**Dhacdada** Warbixinta halkaan ku jirto ma ku xirna sharciga laakin waxaa si kaliya lagu bixiyay jaheynta guud. Kala tasho Revised Code of Washington (RCW) ee hadeer la sameeyay Washington Administrative Code (WAC) ee sharciyada quseeyo iyo xeerarka.




1. **Sheyga ugu horeeyo ee subixii**, fur tuubada biyaha qabow qulqul caadi ah oo biyaha socdaan 30 ilbiriqsi.

2. **30 ilbieiqsi kadib**, iyada oo biyaha marayaan meesha dhalada muunada ee ka hooseeyo qasabada oo buuxiyo dhalada muunada  illaa garabka ama leenka ku calaameysan “250 mL”. Si dhuuqsan u xir daboolka.



3. **Buuxi qaabka sheybaarka iyo simmada dhalada** (haddii ay quseyso).
Hubi inaad qabatid isla warbixinta ee rasiidka sheybaarka ku jirto (magaca, taariiqda tusaalaha, iwm.) horay ayaad u qabatay, oo **ogow inay kuwaan yihiin “muunooyinka biya raacinta.”**



4. **Ku celi nidaamkaan qasabad walba halka ka soo baxa muunada koowaad dhaaftay mirirka iyo naxaaska heerka tallaabada** iyo ku gudbi muunooyinka sheybaarka ee falanqeyn ah.



**Dhacdada** Warbixinta halkaan ku jirto ma ku xirna sharciga laakin waxaa si kaliya lagu bixiyay jaheynta guud. Kala tasho Revised Code of Washington (RCW) ee hadeer la sameeyay Washington Administrative Code (WAC) ee sharciyada quseeyo iyo xeerarka.

## Yareynta Gaarista Mirirka iyo Naxaaska ee Biyaha Cabitaanka

Si loo yareeyo gaarista mirirka ee biyaha cabitaanka ee xaruntaada, waxaa jiro dhoor waxyaabo oo aad sameyn kartid si ku saleysan maalin walba.

1. **Biyo raaci dhammaan qasabadaha biyaha cabitaanka.** Inta dheer ee biyaha fadhiyaan iyaga oo aan la isticmaalin qasabadaha iyo tuubada, fursada ugu weyn ee mirirka sareeyo iyo heerarka naxaaska ee biyaha. Bilowga maalin walba, ka hor inta aadan isticmaalin wax biyo ah oo cabista iyo karinta, daar qasabad walboo biyo qabow ah (hal waqtigiiba) oo u ogolow inay biyaha socdaan illaa laga ogaado inay qaboobeen. Waxay ka tanaasulayaan biyaha fadhiyay qasabadaha iyo tuubeynta oo ka keen biyo cusub. Haddii qasabadaha lagu isticmaalo dhinaca maalinta waxay kugu caawineysaa yareynta suurtogalnimada mirirka iyo naxaaska ku cagaaranayo biyaha.
2. **La isticmaalay kaliya biyo qabow si loogu diyaariyo cunto iyo cabitaano.** Biyaha kulul waxay burburiyaan mirirka iyo biraha kale si aad u dhaqsi ah oo ka daran biyaha qabow. Haddii aad u baahantahay biyo kulul si aad ugu diyaarisid cunto ama cabitaano, waa inaad ka soo shubataa biyo tuubada qabow oo aad kululeysaa. **Biyaha kulul ee ka imaado qasabada waa inaan MARNABA LOO ISTICMAALIN IN LAGU DIYAARIYO CAANAHA GASACA ILMAHA.**
3. **Qasabadaha tuubada biyaha nadiifka ah iyo afafka tuubada ee si joogta ah ku saleysan.** Shaashada yar ee dhammaadka qasabada ee tuubada, inta badan waxaa loo yaqaan afka tuubada, waxaa ku xirma karo burburka wadan karo mirirka. Nadiifinta shaashada waxay inta badan ka ilaalin kartaa burburka ku dhismayo oo ku deeqayo heerarka mirirka sareeyo ee biyaha aad cabtid.

## Wixii Warbixin Dheeraad ah

Haddii aad su'aalo qabtid ee ku saabsan baaritaanka iyo naxaaska ee xaruntaada, la xiriir Xafiiskaaga Goobta DEL.

**Aberdeen**
360.537.4312
Taleefon bilaash ah:
1.800.451.9994
ext. 3

**Bellevue**
425.590.3100

**Bellingham**
360.714.4118
Taleefon bilaash ah:
1.800.735.7040

**Silverdale**
360.698.4388

**Everett**
425.740.6871

**Kelso**
360.501.2645

**Mount Vernon**
360.714.4118
Taleefon bilaash ah:
1.800.344.8219

**Olympia**
360.407.1992
Taleefon bilaash ah:
1.877.487.4866

**Port Angeles**
360.405.5822

**Seattle area – Renton**
425.917.7941

**Spokane**
509.789.3820

**Tacoma**
253.983.6400
Taleefon bilaash ah:
1.888.583.7254

**Tri-Cities**
509.544.5705

**Vancouver**
360.993.7946

**Wenatchee**
509.665.5289

**Yakima**
509.834.6847



**Dhacdada** Warbixinta halkaan ku jirto ma ku xirna sharciga laakin waxaa si kaliya lagu bixiyay jaheynta guud. Kala tasho Revised Code of Washington (RCW) ee hadeer la sameeyay Washington Administrative Code (WAC) ee sharciyada quseeyo iyo xeerarka.